

Tusmada

Habraaca faallada dadweynaha	1
Sida loo soo gudbiyo faallooyinka	2
Macluumaad Hore	3
Ujeedada, yoolalka, iyo hadafyada.....	5
Ka faa'iidaystayaasha ay saamayn doonto bandhigga.....	7
Nidaamka gaarsiinta iyo shuruudaha u-qalmitaanka	11
Isbeddellada faa'iidooyinka iyo caymiska	12
Shuruudaha kharashka wadaagga	12
Qiyaasta isbeddelka la filayo ee diiwaangelinta sannadlaha ah iyo kharashyada sannadlaha ah	12
Mala-awaalka iyo halbeegyada qiimaynta.....	13
Awodaha ka dhaafida iyo kharashaadka ayaa codsaday bandhiga	15

Habraaca faallada dadweynaha

OHA waxay furi doontaa xilliga ka faalloonshaha dadweynaha ee qabyo-qoraalka 1115 ee Codsiga Cusbooneysiinta Bandhigga Medicaid laga bilaabo Disrembar 7, 2021 illaa Janaayo 7, 2022. Inta lagu jiro wakhtigan, faallooyin qoraal iyo hadal ah oo ku saabsan codsiga la soo jeediyay waa la aqbali doonaa. Faallooyinka waxaa loo isticmaali doonaa in lagu ogeysiyo codsiga kama dambaysta ah ka hor inta aan loo gudbin Xarumaha Medicare iyo Adeegyada Medicaid (CMS) ee Febraayo 2022.

Codsiga qabya qoraalka ah ayaa laga heli karaa

halkan: <https://www.oregon.gov/oha/HSD/Medicaid-Policy/Documents/Waiver-Renewal-Application.pdf>.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu wax ka ogaado oo isticmaalo barnaamijyada iyo adeegyada OHA. OHA waxay bixisaa caawin bilaash ah. Tusaalooyinka qaarkood ee caawintya bilaashka ah ee OHA ay ku siin karto waa:

- Luqadda dhegoolaha iyo turjubaanka luqadda lagu hadlo
- Qoraal ku qoran luqado kale
- Farta Indhoolaha
- Daabacaad Balaadhan

- Maqal iyo qaabab kale

Si aad u hesho dukumeenti qaabab kale ah, fadlan la xidhiidh **NAME** barta **PHONE NUMBER** or **EMAIL**.

Sida loo soo gudbiyo faallooyinka

Dadweynaha waxa lagu martiqaadayaa inay faallooyin qoraal iyo hadal ah ka bixiyaan codsiga ka-dhaafka qabya-qoraalka laga bilaabo Diseembar 7, 2021 illaa Janaayo 7, 2022. **Xilliga kama dambaysta ah ee faallooyinka waa Janaayo 7, 2022, 11:59 PM, Waqtiga Baasifigga.** Dadweynuhu waxay bixin karaan faallooyin af ama qoraal ah. Dhammaan faallooyinka dadweynaha ee ay hesho OHA waxaa lagu dhejin doonaa [Oregon.gov/1115WaiverRenewal](https://www.oregon.gov/1115WaiverRenewal).

Laga bilaabo Diisambar 7, 2021, faallooyin qoraal ah ayaa iimaylka lagu soo diri karaa 1115Waiver.Renewal@dhs.oregon.gov, lagu soo gudbin karaa [Oregon.gov/1115WaiverRenewal](https://www.oregon.gov/1115WaiverRenewal), ama lagu soo diri karaa boostada:

Kooxda Siyaasadda Caafimaadka iyo Falanqaynta ee Cusbooneysiinta Ka-dhaafitaanka Medicaid
Fiiro gaar ah: Michelle Hatfield
500 Summer St. NE, 5th Floor, E65
Salem, OR 97301

Xubnaha dadwaynaha ayaa laga yaabaa inay faallo afka ah ka bixiyaan mid ka mid ah dhegaysiyada dadwaynaha ee soo socda:

Guddiga Siyaasadda Caafimaadka Oregon

Diseembar 7, 2021 | 8:30 a.m. – 12 p.m.

Uga soo biir Kulanka:

<https://www.zoomgov.com/j/1602657497?pwd=emhzUnJsK1EzWk5rV0VpYTdjU3VrQT09>

Taabashada moobilka ee halka mar ah: [+16692545252](tel:+16692545252), 1602657497#, , , , , 0#, , 306554#

Haddii aad u baahan tahay gargaar ama tixgelin gaar ah, fadlan kala xidhiidh Tara Chetock 971-304-9917 ama tara.a.chetock@dhs.oregon.gov ugu yaraan 48 saacadood ka hor kulanka.

Kulanka Iskaashiga Bulshada (en Español)

Diseembar 9, 2021 | 3:30 p.m. – 5:30 p.m.

Uga biir kulanka: <https://us02web.zoom.us/j/928637902?pwd=Zkde6uqTsuGtE7CbrxDUI4WL0f70I18wg5>

Guddiga Sinaanta Caafimaadka

Diseembar 9, 2021 | 12 p.m. – 2 p.m.

Kulanka Microsoft Teams [Guji halkan si aad ugu biirto kulanka](#)

Ama soo wac (maqal kaliya)

Taabashada moobilka ee halka mar ah: [+1 971-277-2343](tel:+19712772343), 928637902#

Aqoonsiga Shirka Taleefanka: 928 637 902#

Haddii aad u baahan tahay gargaar ama tixgelin gaar ah, fadlan kala xidhiidh Maria Castro at 503-884-4448 ama maria.castro@dhs.oregon.gov ugu yaraan 48 saacadood ka hor kulanka.

Guddiga La-talinta Medicaid

Diseembar 15, 2021 | 9 a.m. – 12 p.m.

Kulanka Microsoft Teams [Guji halkan si aad ugu biirto kulanka](#)

Ama soo wac (maqal kaliya)

Taabashada moobilka ee halka mar ah: [+1 971-277-2343,,243372877#](#) Aqoonsiga Shirka Taleefanka: 243 372 877#

Haddii aad u baahan tahay gargaar ama tixgelin gaar ah, fadlan kala xidhiidh Jackie Wetzel at 503-580-5603 ama Jackie.Wetzel@dhs.ohio.gov ugu yaraan 48 saacadood ka hor kulanka.

Dejinta mustaqbalka OHP - Aqoon-is-weydaarsiga 3aad

Diseembar 16, 2021 | 5:30 p.m. – 7:30 p.m.

Horay isaga diwaangeli kulankan: https://www.zoomgov.com/meeting/register/vJlsc--spjoqHteaw5dXCTUmWwDVE_7NgDU

Haddii aad u baahan tahay gargaar ama tixgelin gaar ah, fadlan kala xidhiidh Michelle Hatfield barta 503-551-3881 ama michelle.m.hatfield@dhs.ohio.gov ugu yaraan 48 saacadood ka hor kulanka.

Kulanka Iskaashiga Bulshada

Diseembar 17, 2021 | 10:30 a.m. – 12:30 p.m.

Uga soo biir Kulanka: <https://us02web.zoom.us/j/6trD8sEtHdQadI0abTNYkZVpjhdfJ>

Guddiga Siyaasadda Caafimaadka Oregon

Janaayo. 4, 2022 | 8:30 a.m. – 12 p.m.

Uga biir Kulanka ZoomGov

<https://www.zoomgov.com/j/1609166382?pwd=Ulp0eis5bUZPeUNQdWM3VU9aMnZwQT09>

Aqoonsiga Kulanka 160 916 6382 Lambar sireedka: 912812

Taabashada moobilka ee halka mar ah: [+16692545252,,1609166382#](#) ,, 0#,,912812# US (San Jose)

Haddii aad u baahan tahay gargaar ama tixgelin gaar ah, fadlan kala xidhiidh Tara Chetock 971-304-9917 ama tara.a.chetock@dhs.ohio.gov ugu yaraan 48 saacadood ka hor kulanka.

Macluumaad Hore

Sannadkii 2012, Oregon waxa uu bilaabay Ururada Daryeelka Isku-xidhan (CCOs) iyada oo loo marayo ka dhaafida 1115 Medicaid ee gobolka iyo deeqda qaab hindhiseedka ee gobolka ee la socota ee katimid Xarunta Medicare iyo Medicaid Innovation (CMMI). CCO-yadu waa ururo bulshada ku salaysan oo siiya daryeelka xubnaha Medicaid iyada oo loo marayo qaabka daryeel isku xidhan ee bixinta adeega loogu talagalay in wax looga qabto dhibaatooyinka ka jira nidaamka caafimaad ee kala daadsan. CCOs ayaa mas'uul ka ah adeegyada daryeelka caafimaadka jirka, dhaqanka iyo afka ee xubnaha Medicaid. Waxay ka helaan gobolka miisaaniyad go'an oo bille ah si ay iskugu xidhaan daryeelka oo leh dabacsanaan si ay wax uga qabtaan baahiyaha xubnahooda ee ka baxsan adeegyada caafimaadka dhaqameed iyo dhiirrigelinta maaliyadeed ee horumarinta natiijooyinka iyo tayada.

Oregon waxa ay sii wadi doontaa qaabka CCO ee bandhigga dib u cusboonaysiinta la soo jeediyay. Sida hadda la hirgaliyay, dib u cusboonaysiinta bandhiga waxay sii socon doontaa inay ka shaqeyso gobolka oo dhan waxayna dabooli doontaa 1.3 milyan oo Oregonian ah oo hadda faa'iidada ka helaya OHP waxayna soo jeedinaysaa isbeddelada faa'iidooyinka ay heli karaan xubnaha jiray. Codsigu waxa kale oo uu soo jeedinayaa baddelka u-qalmitaanka kaas oo gaarsiin kara caymiska shakhsiyaadka aan hadda u qalmin in ay iska diiwaan geliyaan CCO. Gobolku waxa uu doonayaa in uu dib u cusboonaysiiyo bandgigan laga bilaabo Luulyo 1, 2022 ilaa Juun 30, 2027 si Oregon u sii wado isbeddelka nidaamka caafimaadka iyada oo loo marayo wax ka beddelka gaarka ah ee barnaamijyada Medicaid iyo CHIP ee hoos imanaya ka dhaafka hadda jira. Dib-u-habayntani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu gaadho yoolkiisa guud ee la jaanqaadaya ujeeddada saddexlaha ah ee lagu wanaajinayo khibrada bukaanka, horumarinta caafimaadka, iyo dhimista kharashyada.

Lacagta lagu bixiyo xubin kasta bishiiba waxa ay ku dhafantaa daryeelka caafimaadka jidhka, dhaqanka iyo afka oo hoos imanaya hal maal-gelin oo waxa ay siisaa CCO-yada dabacsanaanta sida doollarka loo isticmaalo iyada oo lagu haynayo kharashyada ilaa 3.4% kobaca sanadlaha ah. Intaa waxaa dheer, qaabka CCO wuxuu u baahan yahay ka-qaybgalka bulshada ee go'aan qaadashada. Golayaasha La-talinta Bulshada (CACs) ee CCO kasta waxay la falgalaan xubnaha CCO iyo wakiilada kale ee beesha si ay u hagaan qaar ka mid ah kharashyada ku jira miisaaniyada dabacsan. CACs waxay isticmaalaan Qiimaynta Caafimaadka Bulshada iyo Qorshayaasha Horumarinta Caafimaadka Bulshada si ay u bixiyaan tilmaamo oo ay u hubiyaan la jaanqaadidda isbitaalada deegaanka iyo maamulka caafimaadka dadweynaha. 2017, dib u cusboonaysiinta Oregon waxay balaadhisay dadaalkan iyadoo diiradda la saarayo maalgashiga caksiga ah ee go'aaminta bulshada ee caafimaadka iyada oo la adeegsanayo adeegyada caafimaadka la xiriira (HRS) taas oo u ogolaatay CCO-yada dabacsanaan dheeraad ah si ay u bixiyaan adeegyada aan caafimaadka ahayn ee hagaajinaya natiijooyinka caafimaadka.

HRS waxaa lagu qeexaa inay yihiin adeegyo aan la daboolin ee hoos yimaada Qorshaha Gobolka ee Medicaid ee aan sida kale ahayn shuruudaha maamul waxaana loogu talagalay in lagu wanaajiyo bixinta daryeelka iyo guud ahaan caafimaadka iyo fayoobida xubnaha iyo bulshada. Mid ka mid ah ujeedooyinka HRS waa in la siiyo CCOs hab maalgelineed gaar ah oo ku jira miisaaniyadooda si ay wax uga qabtaan go'aamiyaasha bulshada ee caafimaadka (SDOH), oo ay ku jiraan baahiyaha bulsho ee la xidhiidha caafimaadka xubnahooda. CCOs si ay u isticmaalaan lacagaha Medicaid ee federaalka si ay ugu bixiyaan HRS, waa inay u hoggaansamaan shuruudaha gobolka iyo federaalka. Hadafka HRS waa in kor loo qaado isticmaalka hufan ee kheyraadka iyo wax ka qabashada xubnaha go'aaminta bulsheed ee caafimaadka si loo wanaajiyo natiijooyinka caafimaadka, loo yareeyo kala duwanaanshaha caafimaadka, iyo horumarinta fayoobida guud ee bulshada.

Kuwa soo socda ayaa ah walxaha qaybta 1115 ee bandhigga hadda jirta ee la soo jeediyay in la sii wado:

- Qandaraaska lala yeesho Ururada Daryeelka Isku-xidhan (CCOs) si ay u bixiyaan adeegyada caafimaadka jidhka, dhaqanka, iyo afka xubnaha Qorshaha Medicaid Oregon Health Plan
- Isticmaalka liiska mudnaanta la siiyay ee xaaladaha iyo daawaynta, ee ku xiran waxyaabo ka reeban ee faa'iidooyinka la ilaaliyo
- Isticmaalka Adeegyada La Xiriira Caafimaadka

- Ku xadee caymiska adeegyada daawaynta ee la aqoonsaday inta lagu guda jiro Baaritaanka Hore iyo Xilliyeedka, ogaanshaha iyo Daaweynta (EPSDT) adeegyadan ku habboon liiska adeegyada caafimaadka ee shaqsiyaadka ka weyn da'da koowaad
- Qeex noocyada caymisyada oo si khasab ah isku diiwaan geli oo si toos ah ugu diiwaan geli shakhsiyaadka qorshayaasha daryeelka maaraysan
- Isuduwidda daryeelka ee shakhsiyaadka deggan xarumaha cudurrada dhimirka (IMDs)

Sii wad lacagaha Daryeelka Aan Magdhowga lahayn ee Barnaamijka Xarunta Caafimaadka Qabiilka

Ujeedada, yoolalka, iyo hadafyada

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa soo gudbin doona codsiga dib u cusboonaysiinta Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) 1115(a) Ka Dhaafista Bandhigga Luulyo 1, 2022-Juun 30, 2027 muddada bandhigga. Cusboonaysiinta ayaa codsanaysa isbedel ku samaynta bandhiga hadda kaas oo:

- Kordhin doona helitaanka caymiska joogtada ah ee OHP ee dadka qaarkiis iyadoo la soo jeedinaya isbeddelada hababka diiwaangelinta ee hadda iyo shuruudaha u-qalmitaanka;
- Qeexaya xirmo faa'iido taxane ah oo adeegyo taageero ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka la kulma kala-guurka nidaamyada kala duwan, guud ahaan goobaha daryeelka caafimaadka, iyo marxaladaha nolosha oo dhan ama dhacdooyinka waqtiga gooni ah awgeed iyada oo ujeedadu tahay in la yareeyo carqaladaha daryeelka ee inta badan dhaca inta lagu jiro kala-guuradan;
- Soo jeediya wax ka beddelka habka loo isticmaalo in lagu dejiyo sicirka qiimo-gownta ee loo isticmaalo in lagu bixiyo lacagta CCO-yada;
- U oggolaan doonto CCO-yada in ay ku bixiyaan 3% sicirkooda qiima-gownta xubin kasta bishiiba maal-gelinta si loo hagaajiyo sinnaanta caafimaadka iyo in maal-gashigaas loogu tiriyo kharashyada caafimaadka inta lagu jiro horumarinta heerka sida uu u baahan yahay Sharciga Baarlamaanka 3353 ee Kalfadhiga Sharci-dejinta ee Oregon 2021;
- Codsonaya maalgelinta federaaliga ah ee lagu kharash gareynayo hagaajinta sinnaanta caafimaadka, oo ay ku jiraan maalgelinta lagu dhisayo kaabayaasha si loo taageero waxqabadyada sinnaanta caafimaadka, si loo taageero waxqabadyada sinnaanta caafimaadka ee ay bulshadu hoggaaminayso iyo dadaallada gobolka oo dhan, iyo in la siiyo ilo iskaashi oo ay bulshadu hoggaamiso loo maal-gashado sinnaanta caafimaadka.
- La siiyo gobolka awood uu ku qeexo daawooyinka la door bidayo ee xubnaha OHP si loo xakameeyo saameynta maaliyadeed ee kor u kaca kharashaadka daroogada;
- Beddela habraaca xulashada iyo hawlgelinta cabbirada dhiirigelinta CCO si diiradda loo saaro dhimista sinnaan la'aanta caafimaadka; oo
- Loo Balaariyo faa'iidooyinka Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska ee xubnaha OHP si loogu daro dhaqamada ku salaysan Qabiilka sida adeeg caymisan, iyo laga dhaafo shuruudaha oggolaanshaha hore ee xubnaha qabiilka

Isbedellada barnaamijka la soo jeediyay ayaa buuxin doona yoolalka iyo hadafyada soo socda:

- Sarreysiinta helitaanka joogtada iyo sinnaanta leh ee caymiska

- Turxaan bixinta kala-guuryada u dhexeeya nidaamyada iyada oo loo marayo xirmooyin faa'iido oo qeexan ee go'aamiya adeegyada caafimaadka bulshada
- Kordhinta dabacsanaanta Ururada Daryeelka Isku-xidhan (CCOs) si ay u maalgashadaan caafimaadka bulshada iyo sinnaanta caafimaadka
- Hagaajinta caafimaadka iyadoo la adeegsanayo maalgelinta sinnaanta diiradda saarayso ee ay hogaaminayaan bulshooyinka
- Hubinta tayada iyo helidda iyada oo loo marayo cabbirada waxqabadka horseedayo sinnaanta
- La jaanqaadidda sagaalka mudnaan ee Qabiil dawladeedka Oregon

Ka faa'iidaystayaasha ay saamayn doonto bandhigga

Oregon waxa ay u soo jeedinaysaa isbeddelada soo socda ka faa'iidaystayaasha hoos yimaada bandhiga:

Dadweynaha	Shuruudaha	Isbeddellada la soo jeediyay
Dhalinyarada leh Baahida Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah	<i>Dhalinta iyo da'yarta leh xaalad dabeecad, korriin, shucuur, iyo/ama jireed ee da'doodu tahay 17 ilaa 26 sano oona hela adeeg ama xaq u yeelashada Medicaid iyada oo loo marayo Dadka Da'da ah iyo Dadka Naafada ah (APD), Adeegyada Naafada Korriinka Oregon (ODDS); ama, lagu aqoonsado iyada oo loo marayo Pediatric Medical Complexity Algorithm (PMCA); ama lagu aqoonsado tilmaamayaasha soo socda: Naafanimada garaadka ama korriinka (IDD), ama tilmaamayaasha Liidashada ama Gabidda Caafimaad</i>	Isbedelada la codsaday waxay u kordhinayaan caymiskan ilaa da'da 26 waxayna u qalmin doonaan adeegyada loogu talagalay in lagu taageero shaqaalaysiinta, horumarinta xirfadaha nolosha, iyo faa'iidooyinka kale ee loogu talagalay in lagu caawiyo u gudbida faa'iidooyinka dadka waaweyn.
Xubnaha OHP ee Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska	<i>Xubnaha OHP ee u diiwaangashan Hindi Mareykan ama Dhaladka Alaska ahaan</i>	Adeegyada la siiyo xubnahan waxay laga dhaafi doonaa shuruudaha oggolaanshaha hore ee dhammaan adeegyada la siiyo xubnaha qabaa'ilka ee hoos yimaada OHP. Intaa waxaa dheer, soo jeedinta ayaa codsanaya in Hab-dhaqannada ku salaysan Qabaa'ilka ee qeexan lagu daraa adeegyada la daboolay ee xubnaha qabaa'ilka.

Dadweynaha	Shuruudaha	Isbeddellada la soo jeediyay
Dhalinyarada ku xiran xabsiyada Asluubta Dhallinta (Maamulka Dhallinyarada Oregon)	<i>Dhallinyarada xabsiga ku jirta (ka hor iyo ka dib xukunka) ee Asluubta Dhallinta ee gala diiwaan gelinta OHP ee hadda ama la diiwaan geliyo inta lagu jiro xabsiga</i>	Dhallinyarada xabsiga lagu hayo waxay sii wadi doonaan is-diiwaangelinta joogtada ah ee OHP inta lagu jiro wakhtiga ay xabsiga ku jiraan, taasoo u oggolaanaysa inay helaan xirmo adeeg taageero oo la cayimay si looga caawiyo kala-guurka wakhtiga la sii daayo. Tani waxay ka duwan tahay bandhigga hadda socda ee aan ogolayn in shaqsiyaadka la diiwaan geliyo ilaa inta laga sii daayo.
Dadka waaweyn ee xabsiga ku jira ama ku jira xabsiga Waaxda Asluubta	<i>Shakhsiyaadka ku jira xabsiga Waaxda Asluubta ee loo qorsheeyay in lagu sii daayo 90 maalmood gudahood ama ka yar oo ay buuxiyaan shuruudaha dakhliga Medicaid</i>	Shakhsiyaadka ayaa xaq u yeelan doona inay iska diwaan geliyaan OHP laga bilaabo 90 maalmood ka hor taariikhda la sii daynayo, taasoo u oggolaanaysa inay helaan xidhmo cayiman oo adeegyo taageero ah si looga caawiyo kala-guurka. Tani waxay ka duwan tahay bandhigga hadda socda, kaasoo aan ogolayn in shaqsiyaadka xabsiga lagu qoro ilaa laga soo daayo.
Dadka waaweyn ee lagu hayo xarumaha asluubta ee deegaanka	<i>Shakhsiyaadka lagu hayo xabsiga (ka hor iyo xukun ka dib xukunka) ee jeelasha degmada ama xarumaha asluubta deegaanka ee soo gala diiwaan gelinta OHP hadda ama la diiwaan geliyo inta ay xabsiga ku jiraan.</i>	Shakhsiyaadka ka diiwaangashan OHP wakhtiga lagu hayo xabsiga jeelasha degmada ama xarumaha asluubta lagama saari doono OHP. Tani way ka duwan tahay bandhigga hadda, kaas oo hakinaya diiwaangelinta wakhtiga la xiray xitaa haddii eedeymaha aysan sii socon.

Dadweynaha	Shuruudaha	Isbeddellada la soo jeediyay
Shakhsiyaadka ku sugan Isbitaalka Gobolka Oregon	<i>Shakhsiyaadka ku jira daryeelka Isbitaalka Gobolka Oregon (OSH) ee la kulma u-qalmitaanka dakhliga Medicaid ee loo qorsheeyay in laga saaro 90 maalmood ama ka yar.</i>	Shakhsiyaadka ku jira daryeelka ama haynta Isbitaalka Gobolka Oregon waxay xaq u yeelan doonaan inay iska diwaan geliyaan OHP laga bilaabo 90 maalmood ka hor taariikhda la sii daayo. Tani way ka duwan tahay bandhigga hadda, kaas oo hakinaya diiwaangelinta wakhtiga qaabilaadda.
Shakhsiyaadka deggan Xarumaha Degenayaasha Dhimirka (IMD)	<i>Shakhsiyaadka ku jira daryeelka Machadka Cudurka Dhimirka (IMD) ee la kulma u-qalmitaanka dakhliga Medicaid kuwaas oo loo qorsheeyay in laga saaro 90 maalmood ama ka yar.</i>	Shakhsiyaadka ku jira daryeelka Xarunta Daawaynta Deegaanka Dhimirka waxay xaq u yeelan doonaan inay iska diiwaangeliyaan OHP laga bilaabo 90 maalmood ka hor taariikhda laga saaray. Tani way ka duwan tahay bandhigga hadda jira, kaas oo joojinaya diiwaangelinta marka shakhsigu galo xarunta noocan ah.
Dhalinyaro ka baxaysa Xannaanada Korinta	<i>Dhallinyarada hadda ka diiwaangashan OHP kuwaas oo ku lug leh ama halis ugu jira inay ku lug yeeshaan nidaamka daryeelka carruurta, u gudbaya oo ka baxaya guryaha daryeelka korinta, oo ay ku jiraan kuwa ka gaboobaya nidaamka</i>	Shakhsiyaadka ayaa u qalmi doona adeegyada taageerada sida guriyeynta, tababarka xirfadaha nolosha, caawinta shaqada, ama gaadiidka, oo ay ku jiraan taageerada asaaga ama hagidda marka la beddelayo guryaha korinta ee ka gabowga daryeelka korinta, ama ku soo noqoshada guriga asalka. Adeegyadan hadda laguma bixiyo bandhigga.

Dadweynaha	Shuruudaha	Isbeddellada la soo jeediyay
Xubnaha ka wareegaya ceymiska Medicaid kaliya una gudbaya caymiska Medicare-Medicaid	<i>Xubnaha OHP ee hadda jira kuwaas oo labadoodaba u qalma Medicare iyo Medicaid marka la eego go'aannada u-qalmitaanka OHP</i>	Shakhsiyaadka laba-geesoodka ah ugu qalma waxa laga yaabaa inay u qalmaan inay helaan taageero dheeraad ah si looga caawiyo u gudbida Medicare, helitaanka faa'iidooyinka ay dhawaan xaq u leeyihiin iyo inay taageeraan sii wadida bixiyeyaasha. Adeegyadan hadda laguma bixiyo bandhigga.
Shakhsiyaadka u nugul dhacdooyinka cimilada ba'an	<i>Shakhsiyaadka ka diiwaangashan OHP ee jooga aagga ay saamaysay xaaladda degdegga ah ee lagu dhawaaqay isbeddelka cimilada awgeed.</i>	Shakhsiyaadka ka diiwaangashan OHP oo jooga aagga ay saamaysay xaaladda degdegga ah ee lagu dhawaaqay sida dabka duurka, dhacdooyinka kulaylka daran, daadadka, ama dhacdooyinka kale ee cimilada waxay u qalmi doonaan inay helaan adeegyo dheeraad ah oo loogu talagalay in lagu yareeyo saameynta xun ee ay ku yeelatay caafimaadka iyo fayyo-qabka qofka. Adeegyadan hadda laguma bixiyo bandhigga.
Carruurta da'doodu ka yar tahay 6 sano	<i>Shakhsiyaadka buuxiya u-qalmitaanka dakhliga Medicaid oo u dhexeeya da'da 0 iyo 6 sano</i>	Carruurta da'doodu ka yar tahay 6 jir loogama baahna inay maraan nidaamka dib-u-eegista xaq u yeelashada sannadlaha ah ilaa ay ka gaaraan da'da 6 waxaana si joogto ah looga diiwaangelin doonaa OHP. Tani way ka duwan tahay bandhiga hadda, kaas oo u baahan dib u go'aaminta u-qalmitaanka sannadkiiba mar.

Dadweynaha	Shuruudaha	Isbeddellada la soo jeediyay
Dadka da'doodu tahay 6 iyo wixii ka weyn	<i>Xubnaha OHP ee hadda jira ee buuxiyay u qalmidda dakhliga Medicaid oo da'doodu tahay 6 iyo ka weyn</i>	Shakhsiyaadka ku jira OHP waxay mari doonaan dib u go'aaminta u qalmidda 24 bilood kasta halkii ay ka ahaan lahayd 12 bilood kasta marka la eego bandhigga hadda.
Dhammaan xubnaha kale ee OHP	<i>Shakhsi kasta oo hadda qaata dheefaha OHP</i>	Shakhsiyaadka qaata dawooyinka dhakhtarku qoro ee hoos yimaada Qorshaha Caafimaadka Oregon waxa laga yaabaa inay arkaan isbeddellada daawooyinka ay doorbidayaan qorshahooda
Shakhsiyaadka u qalma SNAP ee aan hadda ka diiwaan gashanayn OHP	<i>Shakhsiyaadka buuxiya u-qalmiitanka dakhliga Medicaid oo hadda qaata dheefaha SNAP</i>	Shakhsiyaadka u qalma Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah waxaa laga eegi doonaa u-qalmiitanka OHP waxaana la siin doonaa diiwaangelin la turxaan bixiyay iyadoo la isticmaalayo shuruudaha dakhliga ee horay loo dejiyay intii lagu jiray diiwaangelinta SNAP. Tani way ka duwan tahay bandhigga hadda kaas oo si gooni-gooni ah dib ugu eegaya u-qalmiitanka qofka ee OHP iyo SNAP.

Ma jiro isbeddel kale oo lagu sameeyo shuruudaha u-qalmiitanka oo la codsanayo.

Nidaamka gaarsiinta iyo shuruudaha u-qalmiitanka

Oregon waxa ay soo jeedinaysaa in la ilaaliyo qaabka adeeg bixinta Ururka Daryeelka Isku-xidhan (CCO). CCO-yada wali waxaa qandaraas lagu siin doonaa inay xubnaha u qalma siiyaan adeegyada caafimaadka jirka, dhaqanka, iyo afka. Shuruudaha u-qalmiitanka kuma baddelmayaan isbeddellada kor lagu sharraxay.

Isbeddellada faa'iidooyinka iyo caymiska

Faa'iidooyinka xubnaha OHP ee lagu qeexay Qorshaha Gobolka isma beddeli doonaan. Faa'iidooyinka dheeraadka ah ayaa loo heli doonaa shakhsiyaadka u qalma sida waafaqsan isbeddellada u-qalmitaanka ee kor lagu sharraxay, waxaana ka mid ah:

Isbeddellada la soo jeediyay	Barnaamijka hadda
Daboolida adeegyo la qeexay si loo taageero xubnaha ay la darista kala guurka daryeelka ee u dhexeeya nidaamyada, u dhaxaysa goobaha, iyo inta lagu jiro dhacdooyinka tooska ah	Qaar ka mid ah adeegyada ku jira soo jeedintan ayaa laga helayaa CCO-yada sida adeegyada caafimaadka la xiriira, laakiin looma tixgeliyo sida adeeg la daboolay
Helitaanka adeegyada asaageed ee la bixiyo ayaa la ballaariyay si loogu daro caymiska adeegyada ka hor inta aan la samayn qorshaha daawaynta iyo ka dib marka qorshaha daawaynta la dhammeeyo.	Adeegyada asaageed ee la bixiya waxa loo tixgaliyaa adeegyo daboolan marka uu kormeero bixiye shahaado haysta oo lagu daro qorshaha daawaynta xubinta.
Dabacsanaan in laga saaro daawooyinka leh waxtar caafimaad oo xadidan ama aan ku filneyn, oo leh dariiqa daboolida daawooyinka aan la doorbidin	Gobolku awood uma laha inuu ka reebo caymiska dawooyinka la ansixiyay

Wax isbeddelo ah oo kale oo lagu sameeyo dheefaha lama codsan.

Shuruudaha kharashka wadaagga

Wax isbeddel ah oo lagu sameeyay shuruudaha kharashka wadaagga lama codsan. OHP uma baahna kharash wadaagis.

Qiyaasta isbeddelka la filayo ee diiwaangelinta sannadlaha ah iyo kharashyada sannadlaha ah

Xogta taariikhiga ah (xilliga dhaafitaanka hadda)					
	SFY18	SFY19	SFY20	SFY21	SFY22
Wadarta Diiwaangelinta	856,262	857,297	879,157	1,005,122	1,131,501
Wadarta kharashka	\$6,258,934,391	\$6,597,659,631	\$7,073,711,147	\$7,784,273,070	\$9,555,087,914

Muddada cusboonaysiinta bandhigga

	SFY23	SFY24	SFY25	SFY26	SFY27
Wadarta diiwaangeli nta la saadaaliyay	1,019,073	1,123,740	1,132,032	1,134,884	1,115,832
Wadarta kharashka la saadaaliyay	\$10,007,172,653	\$11,620,080,436	\$12,088,770,684	\$12,537,125,292	\$12,556,399,420

Mala-awaalka iyo halbeegyada qiimaynta

Dawladdu waxay soo jeedinaysaa in wax laga beddelo waxa lagu qiimayn doono muddo kordhintan oo la mid ah waxa lagu qiimaynayo bandhigga hadda socda. Isbeddellada ayaa lagu sifeeyay hoos:

S1. Ka dhaafidda dib u cusboonaysiinta 1115 ee la soo jeediyay hoos ma u dhigi doontaa sinnaan la'aanta caafimaadka jinsiyadda iyo qowmiyadda?

Mala-awaalka #1:

Dib ugu qaybinta awooda iyo agabka shakhsiyaadka iyo bulshooyinka ay waxyeelada ugu badan ka soo gaarto cunsuriyadda taariikhiga ah iyo kuwa casriga ah waxay keeni doontaa hagaajinta sinnaan la'aanta caafimaadka iyo cabbiraadaha iskood lo soo-sheega ee is-maamulka, heerka caafimaadka iyo tayada nololaha.

Mala-awaalka #2:

Isticmaalka qaab-dhismeedka cusub ee go'aan-qaadashada si loo doorto loona hawlgeliyo cabbirrada dhiirigelinta CCO waxay keeni doontaa hagaajin oo xagga sinnaan-la'aanta caafimaadka ee jinsiyadda/qowmiyadda marka loo eego qaab dhismeedka go'aan-qaadashada ee jiray intii lagu jiray dhaafitaanka 2012-2017.

S2. Caymis joogto ah ma hagaajin doonaa natiijooyinka caafimaadka?

Mala-awaalka #3:

Isdiiwaangelintii hore ee OHP ee lahayd kala tagnaanta yar ee daboolida dadyowga nugul waxay keeni doontaa in xubno badan ay ku helaan daryeel goob sax ah, iyo hagaajinta xaalada caafimaad iyo tayada nololaha.

Mala-awaalka #4:

Siinta xirmooyinka adeegyada taageerada SDOH shakhsiyaadka la tacaalaya kala-guurka ayaa aad waxtar ugu leh horumarinta isdhexgalka si loogu guuleysto kala-guurka marka loo eego bixinta adeegyada gaarka ah oo keliya.

S3. Habka dhisidda heerka cusub ee miisaaniyad ku salaysan qiimaha miyuu kordhiyaa kharashaadka CCO ee maalgashiga bulshada si loo yareeyo sinnaan la'aanta caafimaadka?

Mala-awaalka #5:

Bixinta miisaaniyad la saadaalin karo, oo ku salaysan hab la turxaan bixiyay oo leh kobac kharasheed la saadaalin karo, waxay u oggolaanaysaa in ay sii caddaato lacagaha la heli karo ee dib-u-maalgelinta CCO ee bulshada deegaanka waxayna kordhisaa maal-gashiga bulshada.

Mala-awaalka #6:

Bixinta miisaaniyad la saadaalin karo, oo ku salaysan hab la turxaan bixiyay oo leh kobac kharasheed la saadaalin karo, waxay u oggolaanaysaa la-hawlgalayaasha bulshada inay si wax ku ool ah ula shuraakoobaan CCOs si ay u daboolaan baahiyaha xubnaha ee adeegyada taageerada SDOH.

Awodaha ka dhaafida iyo kharashaadka ayaa codsaday bandhiga

Oregon waxa ay codsanaysaa in la sii wado awoodaha ka dhaafitaanka iyo kharashaadka hoose loo sii isticmaalo bandhiga hadda:

Awodda ka dhaafida	Adeegsiga ka dhaafida
Qaybta 1115 (a)	Sii wadida Barnaamijka Daryeelka Aan Magdhowga lahayn ee Qabiilka ee gobolka (UCCP)
42 CFR § 438.56	<ul style="list-style-type: none"> • Ogolaanshaha is-diiwaangeliyaasha laba-geesoodka ee u qalma Medicare iyo Medicaid inay iska diiwaan geliyaan CCO-yada sabab la'aan wakhti kasta • Heshiis lala galo hay'adaha daryeelka maaraysan iyo caymisyada ka shaqeeya deegaanka • Bixi faa'iidooyinka si waafaqsan liiska mudnaanta leh ee xaaladaha iyo daawaynta, iyadoo ku xiran waxyaabo ka reeban qaarka mid ah faa'iidooyinka la ilaaliyo • Ku xadee caymiska adeegyada daawaynta ee la aqoonsaday inta lagu guda jiro Baaritaanka Hore iyo Xilliyeedka, ogaanshaha iyo Daaweynta (EPSDT) adeegyadan ku habboon liiska adeegyada caafimaadka ee shaqsiyaadka ka weyn da'da koowaad • Qeex noocyada caymisyada oo si khasab ah isku diiwaan geli oo si toos ah ugu diiwaan geli shakhsiyaadka qorshayaasha daryeelka maaraysan • Ha bixinin lacagaha saamiga isbitaalada ee xad-dhaafka ah ee isdiiwaangeliyaasha daryeelka maaraysan • Guud ahaan, in loo ogolaado ururada daryeelka isku-xidhan inay xaddidaan wakhtiyada ay isdiiwaangeliyaashu iska xiri karaan diiwangelinta • Bixi caymiska qaar ka mid ah adeegyada ku tiirsan kiimikada ee ka faa'iideystayaasha beegsan • Hel ka qaybgalka maaliyadeed ee federaalka ee qaar barnaamijyada daryeelka caafimaadka ee gobolku maalgeliyo

Marka laga tago awoodda dhaafitaanka Oregon ee jirta, gobolku wuxuu la shaqayn doonaa CMS si loo go'aamiyo in gobolku u baahan yahay awoodda dhaafidda dheeraad ah si loogu oggolaado:

Awodda ka dhaafida	Adeegsiga ka dhaafida	Sababta codsiga dhaafidda
42 C.F.R. 435.916	In awooda kharashaadka loogu oggolaado Gobolka inuu fuliyo diiwaangelin joogto ah.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu codsado ka qaybgalka maaliyadeed ee federaalka silo helo diiwaangelinta joogtada ah ee carruurta iyada oo aan la eegayn haddii dakhliga ubadku ka sarreeyo xadka u-qalmitaanka iyo in la siiyo diiwaangelin OHP ee joogtada ah carruurta ilaa dhalashadooda lixaad (da'da 0-5)
42 C.F.R. 435.916	In awooda kharashaadka loogu oggolaado Gobolka inuu fuliyo diiwaangelin joogto ah.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu dhaafo shuruudaha dib-u-go'aaminta sannadlaha ah ee laxiriirta u-qalmitaanka dakhliga iyo dejinta diiwaangelinta OHP ee labadii sana ee isxigta ah ee dadka da'doodu tahay lix iyo wixii ka weyn.
42 CFR 438.8 and 42 CFR 438.74 45 CFR 158.150 or 45 CFR 158.151	In la Oggolaado in Adeegyada la Xidhiidha Caafimaadka lagu tiriyo tiriyaaha MLR.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu xisaabiyo adeegyada caafimaadka la xiriira ee buuxiya shuruudaha ku jira tirsiga Saamiga Khasaaraha Caafimaad marka la qiimeynayo warbixinta maaliyadeed ee CCO
	In awooda kharashaadka loogu oggolaado Gobolka in uu isticmaalo macluumaadka xaq u yeelashada SNAP sida aasaaska u ah go'aaminta diiwaangelinta Medicaid.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu bixiyo dariiqa isdiiwaangelinta degdega ah ee dadka codsada oo u qalma dheefaha Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP).

Awodda ka dhaafida	Adeegsiga ka dhaafida	Sababta codsiga dhaafidda
	Awoodda kharashaadka ee waxqabadyada caafimaadka la xiriira ee uu gobolku maalgeliyo.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu codsado maalgashi cusub oo federaali ah oo diiradda lagu saarayo hagaajinta sinnaanta caafimaadka, oo ay ku jiraan maalgashiga lagu dhisayo kaabayaasha si loo taageero waxqabadyada sinnaanta caafimaadka; taageero waxqabadyada sinnaanta caafimaadka ee ay bulshadu hogaamiso iyo dadaallada gobolka oo dhan; in la bixiyo agab iskaashi oo ay bulshadu hogaaminayso si ay u maalgashadaan sinnaanta caafimaadka.
	Awoodda kharashaadka si uu biixyo lacagaha bixiyayaasha iyo ururada bulshada ku salaysan ee kaabayaasha iyo dhisidda awoodda	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu codsado maalgashiga federaalka ee Iskaashiga Maalgashiga Bulshada si ay u taageeraan awooda fulinta ee heerka bulshada, oo ay ku jiraan lacag bixinta bixiyayaasha iyo ururada bulshada ku salaysan (CBO) ee kaabayaasha iyo dhisidda awooda.
	Awoodda kharashaadka si loo maalgeliyo adeegyada caafimaadka la xiriira ee shakhsiyaadka inta lagu jiro kala-guurka nolosha qaarkood.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu adeegyada qeexan ee kala-guurka ee SDOH u codsado maalgelin dheeraad ah si loo taageero xubnaha u baahan xilliga kala-guurka ee xilliyada caymiska iyo kala-guurka nolosha.
	Awoodda kharashaadka adeegyada Medicaid ee la siiyo shakhsiyaadka ka tirsan hay'ad	Tani waxay ka dhaafaysaa sharciga federaalka ee ka hortagaya caynsanaanta Medicaid qofka xabsiga ku jira, oo ay ku jiraan dadka caddaaladda ku lug leh iyo kuwa ku jira Isbitaalka Gobolka Oregon iyo xarumaha degaanshaha ee dhimirka, waxayna u oggolaaneysaa gobolka inuu codsado ka qaybgalka maaliyadda federaalka ee diiwaangelinta shaqsiyaadka xabsiga ku jira.

Awodda ka dhaafida	Adeegsiga ka dhaafida	Sababta codsiga dhaafidda
	Awooda kharashaadka adeegyada Medicaid ee la siiyo shakhsiyaadka ka tirsan hay'ad	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu ku daboolo Medicaid kharashyada adeegyada caafimaadka ee xubin xabsi ku jira, oo ay ku jiraan dadka caddaaladda ku lug leh iyo kuwa ku jira Isbitaalka Gobolka Oregon iyo xarumaha deganaanshaha ee dhimirka.
Qaybaha 1902 (a) (10) iyo 1902 (a) (17)	Isbarbardhigga ka-dhaafitaanka si loogu oggolaado Gobolka inuu siiyo faa'iidooyin dheeraad ah YSCHN-yada ilaa da'da 26.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu sii hayo heerarka u-qalmitaanka ilmaha iyo xirmada faa'iidada ee Dhallinyarada Qaba Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah (YSHCN) ee ilaa da'da 26.
Qaybaha 1902 (a) (10) iyo 1902 (a) (17)	Awooda kharashaadka si loo daboolo YSCHN ilaa da'da 26 ilaa 305 % heerka faqriga ee federaalka, kuwaas oo aan si kale xaq ugu yeelan doonin Medicaid.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu codsado ka qaybgalka maaliyadda federaalka ee Dhallinyarada qaba Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah (YSHCN) ilaa da'da 26.
	Maamulka Kharashaadka ee adeegyada ay bixiyaan Shaqaalaha Caafimaad Dhaqameedka, oo ay ku jiraan shaqaalaha caafimaadka bulshada, hagayaasha caafimaadka gaarka ah, fayyo-qabka asaaga iyo khabiirka taageerada iyo umuliso kaalisada.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu ballaariyo oo uu maalgeliyo adeegyada ay bixiyaan Shaqaalaha Caafimaad Dhaqameedka ee ka baxsan goobaha hadda la ansixiyay
42 C.F.R. 438.5	Awooda kharashaadka si loo bixiso qiimayaasha sicirka qiimo-gowsyada ee lagu dhisay ka leexashada heerarka halbeega horumarinta ee lagu sheegay 42 C.F.R. 438.5	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu codsado isbeddellada habka loo adeegsaday sicirka qiimo-gowynta dhisidda xubin kasta bishiiba ee lagu siiyo CCO-yada u fidinta daryeelka xubnaha.

Awodda ka dhaafida	Adeegsiga ka dhaafida	Sababta codsiga dhaafidda
§1902(a)(54); Qeybta 1927(d)(1)(B; §1902(a)(14); Qeybta1916 iyo 1916A; §1902(a)(23)(A)	Ka-dhaafitaanka shuruudaha xaddidaadda caymiska la oggol yahay ee loogu talagalay dawooyinka bukaan-socodka, gaar ahaan §1902(a) (54) ilaa inta ay ku jirto Qaybta 1927(d) (1) (B; §1902 (a) (14) ilaa inta ay ku jirto Qaybta 1916 iyo 1916A; §1902 (a) (23) (A)	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu qeexo liiska daawooyinka la door bidayo oo uu ka saaro daawooyinka aan la hubin ama qiimaha hooseeya marka lagu saleeyo waxtarka bukaan-socodka.
	Awooda kharashaadka si loogu maalgeliyo adeegyada caafimaadka la xiriira ee xubnaha yeesha isbedelada nololaha qaarkood.	Tani waxay u oggolaanaysaa gobolka inuu helo lacag u dhiganta lacagta Medicaid ee lagu kharash gareeyo la tacaalidda Go'aamiyaasha Caafimaadka Bulshada (SDOH) ee xubnaha OHP ee la yeesha isbedel nololeed oo cayiman.
42 C.F.R. 438.5.	Awooda kharashaadka si loo bixiyo sicirka qiima-gowsyada lagu dhisay ka leexashada heerarka halbeega horumarinta ee lagu sheegay 42 C.F.R. 438.5.	Tani waxay u oggolaanaysaa dawlada inay xisaabiso maalgelinta CCO ee sinnaanta caafimaadka ee ay u baahan tahay HB 3353 sida sheegasho kharashaadka caafimaad ama horumarineed ee tayada ujeedooyinka dejinta heerka CCO.

Helidda dukumeenti: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luqad aan Ingiriisi ahayn, OHA waxay kugu siin kartaa macluumaadka qaabab kale duwan sida tarjumaad, far waaweyn, ama farta indhoolaha. Kala xidhiidh Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashiga Bulshada iimaylka community.outreach@dhsosha.state.or.us ama wac 1-833-647-3678. Waanu aqbalnaa dhammaan wicitaannada dadka dhagaha adag ama waxaad garaaci kartaa 711.